# DHACDOOYINKA IYO DAMBIYADA NACAYBKA

## Sida aad uga warbixinayso dhacdooyinka iyo dambiyada nacaybka oo aad u helayso caawimo

### Waaxda Adeegyada Caddaalada Dhibanaha California

Xeer-ilaaliyaha Guud ee Gobolka California, Rob Bonta, wuxuu bixinayaa macluumaadka soo socda ee ku saabsan sida loo aqoonsado loona soo sheego dhacdooyinka iyo dambiyada nacaybka, iyo sidoo kale adeegyada loo heli karo dhibbanayaasha.

## *Dhacdo nacayb ama dambi nacayb?*

Wax jiro kala duwanaansho u dhexeeya dambi nacayb iyo dhacdo nacayb sida lagu sharaxay hoos:

**Dambi nacayb** Waa fal dambiyeed (dambi fudud ama dambi culus) oo ka dhan ah qof, koox, ama hanti, kaas oo ay dhiirrigelisay naceyb ama eex kutalagal ah oo laga qabo haybta aqoonsi ee dhibbanaha—ha ahaato mid dhab ah ama mid loo malaynayo. Haybta aqoonsi ee sharcigu ilaaliyay waxay ka dhigan tahay in qof loo arko, loo fahmo, ama loola dhaqmo sidii inuu leeyahay ilaalin sharcigu siiyay, xitaa haddii fahamkaasi aanu sax ahayn. Waxaad noqon kartaa dhibbane dambi naceyb ah haddii laguu bartilmaameedsaday sabab la xidhiidha aqoonsigaaga dhabta ah ama la malaynayo:

- Jidh ahaan iyo maskax ahaanba naafo ah,
- Jinsi, oo loola jeedo lab ama dheddig, kana mid ah aqoonsiga jinsiga iyo muujinta jinsiga.
- Dhalashada,
- Haybta ama qabiilka,
- Diinta,
- Nooca galmada, ama
- La xidhiidhada ama ku xidhnaanshaha qof ama koox leh hal ama in ka badan oo ka mid ah astaamahan “dhabta ah” ama “la malaynayo.”
- Marka loo eego sharciga madaniga ah, waxaa jira astaamo aqoonsi oo dheeraad ah oo la ilaaliyo oo aan halkan lagu soo darin.

Dhibbanaha waxaa ka mid ah, laakiin aan ku ekaan, qof, qoys, koox, xarun bulsho, goob waxbarasho, shirkad, xafiis, hool shirar, goob cibaado, hay’ad gaar ah, hay’ad dowladeed, maktabad, ama dhibbane kale ama dhibbane la beegsanayo oo falka lagu sameeyay.

**Dhacdada nacaybka** waa fal ama hab-dhaqanka uu kiciyay nacayb ama eex kutalagal ah oo lagu qaado koox sharcigu ilaaliyay, balse aan gaadhin heerka fal dambiyeed. Xorriyadda hadalka ee ku xusan Dastuurka Mareykanka iyo kan California wuxuu u oggolaanayaa in la isticmaalo hadal nacayb ah, laakiin kaliya haddii uusan xadgudbin xuquuqda madaniga ah ee dadka kale. Waa inaad usoo sheegtaa dhacdooyinka nacaybka hay’adda booliska ee deegaankaaga. Haddii dhacdo nacayb ay gaadho hanjabaad ama fal dambiyeed ka dhan ah qof ama hanti, markaas waxaa loo aqoonsan karaa dambi nacayb. Sidoo kale, waxaad xaq u yeelan kartaa magdhow madani haddii lagu soo gaadhsiiyo dhacdo nacayb.

Tusaalayaasha dhacdooyinka nacaybka waxaa kamid ah:

- Magacyo aflagaado ah, cay, hadalo xanaf leh, hadalo yasid ah, iyo naanayso cay ah oo ka dhan koox sharcigu ilaaliyay kuwaasoo aan cidna waxyeelo u gaysanayn.
- Bandhigida agab naceyb ah oo lagu muujiyo hanti qof leeyahay, oo aan cidna waxyeelo u gaysanayn.
- Xidhashada dhar ay ku qoran tahay farriin nacayb ah oo aan cidna waxyeelo u gaysanayn.
- Qaybinta agab gudbinaya farriimo nacayb ah goobaha dadweynaha dhexdooda oo aan cidna waxyeelo u gaysanayn.

## *Sida loo ogaado dambi nacayb:*

Calaamadaha muujinaya in fal dambiyeed ka dhashay nacayb ama eex waxaa ka mid noqon kara:

- Dambiga waxaa lagu bartilmaameedsaday dhibbanaha ama hantida sababtoo ah waxay ka tirsanaayeen koox la ilaaliyo, tusaale ahaan diinta, midabka, ama jinsiga qaarkood.
- Dambiga waxa uu sameeyay faallooyin qoraal ama hadal ah oo muujinaya caddaalad daro, tusaale ahaan aflagaado ama astaamo.
- Dambigu wuxuu ka dhacay meel muhiim u ah kooxda la ilaaliyo ee dhibbanaha, tusaale ahaan goob cibaado, xarun bulsho, dibadbax, ama xaflad dhaqameed.
- Dambiga wuxuu ka dhacay taariikh muhiim u ah kooxda la ilaaliyo ee dhibbanaha, tusaale ahaan fasax diimeed, fasax dhaqan sida Sanadka Cusub ee Shiinaha ama dabaaldegga Pride, ama taariikh sanad guuro ah.
- Waxaa ka jira hawlgallo naceyb abaabulan oo ka socda deegaanka.

## *Haddii aad khatar ku jirto, wac 911 ama la xidhiidh hay'adda booliska ee deegaankaaga si degdeg ah. Markaad ka baxdo khatarta oo aad heshay daryeel caafimaad oo loo baahan yahay, haddii ay suuragal tahay waxaad samayn kartaa:*

- Keydi wixii caddayn muuqata ah, tusaale ahaan qoraallo derbiyo ku qoran, alaabo burburtay ama walxo la tuuray, qor wax walba oo aad xasuusato, oo sawirro qaad.
- Hel magacyada iyo xogta la xidhiidha dhibbanayaasha kale iyo markhaatiyaasha, iyo sidoo kale sharaxaadaha iyo macluumaadka ay ka hayaan qofka ama dadka dembiga sameeyay.

## *Haddii aad goobjoog ka noqoto dambi naceyb, waa inaad soo sheegtaa dambiga hay'adda booliska ee deegaankaaga.*

- Waaxda Cadaaladda ee California waxay haysaa qalab iyo kheyraad lagu caawinayo hay'adaha booliska ee deegaanka, gobolka, iyo fadaraalka si ay u baadhaan dambiyada nacaybka, oo ay ku jiraan aqoonsiga, xabsiga, maxkamadaynta, iyo xukunka dadka ka dambeeya dambiyadaas.

## *Waxa adiga iyo bulshadaada aad samayn kartaan si looga hortago nacaybka:*

- **Faham dhibaatada.** Dhammaan daneeyayaasha waxay u shaqayn karaan si wadajir ah si ay u fahmaan dhibaatada deegaanka, si xalal loo gaadho.
- **Kor u hadal oo wacyigelin samee.** Si guud u cambaaree nacaybka iyo dulmiga, oo u sheeg mas'uuliyiinta bulshada inay sidoo kale sidaas sameeyaan.
- **Xooji iskaashiga u dhexeeya hay'adaha booliska iyo bulshada.** Wadashaqaynta xooggan ee u dhexeeya hay'adaha booliska iyo bulshada ayaa aad waxtar ugu leh ka hortagga iyo inay si sax ah uga falceliyaan dambiyada nacaybka.
- **Guddiyada Xidhiidhka Aadanaha** waxay kor u qaadi karaan fahamka bulshada, taageero u fidin karaan dhibbanayaasha, waxayna ka shaqayn karaan ka hortagga dambiyada iyo dhacdooyinka nacaybka mustaqbalka. Waxay sidoo kale wargelin karaan hay'adaha booliska iyo bulshada guud ahaan waxyaabaha ku saabsan dambiyada iyo dhacdooyinka nacaybka, la socon karaan isbeddellada, waxayna u doodaan isbeddelada siyaasadda.

## *Macluumaadka dhibanayaasha:*

Sharciga Xuquuqda Dhibbanayaasha ee California (Cal. Const., art I, § 28), oo loo yaqaan Sharciga Marsy, iyo Xeerka Ciqaabta waxay ku siiyaan xuquuqo sharci oo muhiim ah marka aad tahay dhibbanaha dambi nacayb. Dhibbanayaasha dambiyada iyo dhacdooyinka nacaybka waxay sidoo kale xaq u yeelan karaan magdhow madani oo laga dalbanayo maxkamadaha madaniga ah[i] iyada oo loo marayo Sharciga Xuquuqda Madaniga ee Ralph (Sharciga Madaniga, § 51.7), iyo Sharciga Xuquuqda Madaniga ee Tom Bane (Sharciga Madaniga ah, § 52.1).

- **Xaqa lacag-bixin ee khasaarahaaga.** Kiis dambiyeed gudaheeda, waxaad codsan kartaa oo xaqiijin kartaa magdhow si loo bixiyo khasaaraha hantidaada, kharashka caafimaadka, oo ay ku jirto magdhowga kharashyada macquulka ah ee latalinta, mushaharka lumay, iyo khasaare kale. Inta lagu gudo jiro kiiska madaniga ah, maxkamaddu sidoo kale waxay bixin kartaa amar lagu magdhabayo khasaaraha dhabta ah ee aad gashay, iyo sidoo kale khasaare aan dhaqaale ahayn, sida xanuunka maskaxda iyo isku buuqa. Maxkamad madani waxay amar ku bixin kartaa qofka ku waxyeeleeyay; eedaysanaha, si uu kuu siiyo magdhow tusaale ah ama ciqaabeed, inuu ku bixiyo kharashyada qareenkaaga haddii aad qareen u qortay kaalmada kiis madani, iyo/ama inuu ku siiyo $25,000 sababo la xidhiidha ku xadgudubka xuquuqdaada madaniga ah.
- **Xuquuqda aad u leedahay la wadaagista sheekada.** Kiis dambiyeedka inta lagu gudo jiro, waxaad maxkamadda u sheegi kartaa sida dambigu noloshaada u saameeyay ka hor inta aan xukunka lagu dhawaaqin.
- **Macluumaadka saxda ah ee ku saabsan dambiga kiiska.** Waxaad xaq u leedahay inaad ka hesho xeer-ilaaliyaha macluumaad gaar ah oo ku saabsan kiis dambiyeedka, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku ekaan, macluumaadka soo socda: (1) Xabsiga la geliyey eedaysanaha; (2) Dacwadaha lagu oogay; (3) Dambiga lagu helay, xukunka, iyo/ama xabsiga loo diray eedaysanaha; iyo, haddii ay khuseyso, (4) Taariikhda la qorsheeyey ee la sii deynayo eedaysanaha. Sidoo kale waxaad codsan kartaa inaad hesho ogeysiis macquul ah oo ku saabsan hawlgallada maxkamadda ee dadweynaha iyo habraacyada la xidhiidha xeer-ilaalinta ama sii deynta ka dib xukunka.
- **Xaqa aad u leedahay in maxkamaddu kaa caawiso arrimaha badqabka.** Maxkamaddu waxay bixin kartaa amarro kaa caawin kara, sida amar difaac dambiyeed ama madani ah, si laguu ilaaliyo adiga, qaraabadaada dhow ee la yaqaan, ama lammaanahaaga, ka hortagga falal dheeraad ah oo rabshad wata, hanjabaad, daba-gal, ama dhibsasho ah oo ka imaanaya eedaysanaha, oo ay ku jirto amar qofka eedaysanaha ah kaa fogeeyo.
- **Xuquuqda aad u leedahay asturnaanta iyadoo la tixgalinayo xaaladaada socdaal.** Haddii aad tahay dhibbane ama markhaati dambi nacayb, hay'adaha booliska kumasoo qaban karaan ama laguguma soo sheegi karo xadgudub kasta oo socdaalka ah, ama laguguma wargelin karo hay'adaha socdaalka fadaraalka, ilaa lagugu soo oogay ama lagugu helay dambiyo gaar ah oo ku xusan sharciga gobolka. Sharciga California wuxuu mamnuucayaa hay'adaha booliska inay weydiiyaan shakhsiyaadka, oo ay ku jiraan kuwa  aan soo sheegin ama ah dhibbanayaasha dambiyada suurtagalka ah, xaaladda socdaalkooda. Si kastaba ha ahaatee, shakhsiyaadka doonaya inay helaan fiisaha U (Fiisaha dhibbanaha dambi) ama fiisaha T (Fiisaha dhibbanaha la kulmay tahriibinta dadka), waxay u baahan karaan inay bixiyaan macluumaad ku saabsan xaaladda socdaalkooda hay'adaha booliska si loo tasdiiqiyo fiisaha U ama T.

## *Halka aad ka raadsan karto caawimo:*

- **Wac 911 ama tag cisbitaal deegaankaaga haddii aad u baahan tahay daryeel caafimaad oo degdeg ah. Si aad u gudbiso warbixin, la xidhiidh haayadaha booliska deegaankaaga.**

---

i Kaliya dowladda ayaa dacwadda dambiyeed maxkamad ku soo oogi karta. Ciqaabta kiisaska dambiyeed waxaa ka mid noqon kara, laakiin aan ku ekaan, xabsi, ganaaxyo, ama ciqaabo iyo shuruudo kale oo beddel u ah xabsiga. Dhinaca kale, kiisaska madaniga ah waxaa gudbin kara shakhsiyaad, hay'ado, ama dowladda. Kiisaska madaniga ah waxay xalliyaan khilaafaadka ku saabsan sharciga madaniga, waxaana lagu dabaqaa caddayn ka fudud tan kiisaska dambiyada. Galista xabsigu ma aha cawaaqib ka dhalanaya kiisaska madaniga ah.

- ***CA vs. Khadka*iyo Shabakada Nacaybka**
  *CA vs. Nacaybku* ma aha khad lagu soo sheego hay'adaha booliska, laakiin waxaad soo sheegi kartaa dambiyada iyo dhacdooyinka nacaybka lambarka (833) 866-4283 ama si onlaayn ah https://stophate.calcivilrights.ca.gov/s/. Kasoo warbixintu waxay joojinaysaa in nacaybku caado ka noqdo bulshadeena, waxayna hubinaysaa in dadka ay saameeyeen la siiyo taageero. *CA v. Nacaybku* sidoo kale waxay bixisaa helitaan kheyraad iyo taageero ku habboon dhaqanka bulshada iyo dhibbanayaasha.

- **Waaxda Adeegyada Dhibbanayaasha ee Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee California**
  Waaxada Adeegyada Dhibbanayaasha wuxuu siisaa taageerada dhibbanayaasha dambiyada iyo qoysaskooda dhammaan heerarka habraaca dambiyeedka. Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heli kartaa adigoo wacaya (877) 433-9069 ama booqo: oag.ca.gov/hatecrimes.

- **Waaxda Xuquuqaha Madaniga California (CRD)**
  CRD waa hay'adda gobolka ee mas'uulka ka ah dhaqan-gelinta Sharciga Xuquuqda Madaniga ee Ralph. Haddii aad tahay dhibbane dambi nacayb ama dhacdo nacayb, waxaad ka dacwoon kartaa CRD qofka ku waxyeeleeyay. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida dacwad loo gudbiyo, booqo: Calcivilrights.ca.gov/complaintprocess, ama wac (800) 884-1684 (Wicitaan Bilaash ah) ama (800) 700-2320 (TTY).

- **Xarunta Taageerada Dhibbanayaasha iyo Markhaatiyaasha Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Gobolka Deegaanka**
  Degmo kasta iyo Magaalada Los Angeles waxay leeyihiin Xarun Taageero Dhibbanayaasha iyo Markhaatiyaasha oo si toos ah ula shaqeeya Guddiga Magdhowga Dhibbanayaasha ee California si ay u caawiyaan dhibbanayaasha. Si aad u hesho macluumaad ku saabsan xafiiska deegaanka iyo kheyraadka, booqo: victims.ca.gov/victims/localhelp.aspx.